

Waxaa laga hirgelinayaa bariga magaalada: Khadka Dahabiga Ah ee METRO

Lyada oo qeyb ka ah horumarinta nidaamka gaadiidka ee METRO, Khadka Dahabiga ah waxa uu dadweynaha degaanka ku xirayaa goobaha shaqada, guryaha la degan yahay, xarumaha laga raaco gaadiidka, iyo goobaha ugu muhiimsan ee ku dhereran wadada 94. Khadka dahabiga ah ee METRO waa mid loogu talo galay sagaal meyl oo Basaska Dheereeya Ah (BRT) kaasoo isku xiraya Saint Paul, Maplewood, Landfall, Oakdale iyo Woodbury kuna dhereran wadada 94.



Khadka Dahabiga ah waxa uu noqonayaa kii ugu horeeyey ee BRT noociisa ah oo loogu talo galay masaafo kooban oo bas kaliya ah. Khadka noocan ah waa mid u gaar ah basaska oo kaliya waxaana laga dhisayaa waqooyiga wadada 94.

Khadka Dahabiga ah waxa uu ku soo kordhinayaa fursad qaali ah dadka degan, shaqaalaha iyo ganacsatada iyaga oo xoojinaya ku xirnaashaha duleedka bariga 10 goobood oo laga raaco basaska iyo goobaha basaska laga raaco ee faras magaalaha St. Paul. Khadka Dahabiga ah waa mid adeeg taxane ah, maalinta dhan u kala socda laba dhinac todobada cisho ee todobaadka, oo isku xiraya St. Paul iyo duleedka bariga ee nidaamka gaadiidka dadweynaha ee isa soo taraya.

Waxaa la filayaa in adeegga Khadka Dahabiga ah bilowdo 2024.

▼ Mashruuca khadka Dahabiga ah ee la soo jeediyey.





Gold Line

Khadka Basaska Dheereeya ee Dahabiga ah ee METRO



Muuqaalka waa mid bandhig loogu talo galay waxna laga bedeli karo Waxyaabaha ay dhismayaashu ka kooban yihiin way kala duwan yihiin

Khadka Dahabiga ah waa mid ka mid ah 17 khad ee dheereeya ee METRO heer gobo hirgelineyso kuwaasoo loogu talo galay in ay isku xiraan 522,000 oo qof oo u shaqo taga 310,000 oo shaqo ayna ku qaadaneysa 30 daqiiqo ama ka yar in ay ku gaaraan*.

- Khadka baska oo kaliya loogu talo galay si loo dhaafto saxmadda gaadiidka.
- 10 goobood oo laga raaco gaadiidka maalinta oo dhan.
- 8,000 oo dadwayne raaca basaska*
- Sadex goobood oo gaadiidka la dhigto lagana raaco basaska ee St. Paul, Oakdale iyo Woodbury.

- Waxaa ka faa'iideysanaya 20% dadka deggan magaalada ee aan heysan gaadiid u gaar ah inta uu maro Khadka Dahabiga ah.

Xarumaha gaadiidka laga raaco ee casriga ah waxaa laga helayaa:

- Baska xiga, macluumaadka xiliga basku dhaqaaqayo ama imanayo.
- Kuleyl xilliga qaboobaha, nalalka amaanka ah iyo wicidda gurmada degdegga ah.
- Kaabiga laga fuulo baska - baska oo socod lagu galo iyada oo aan la talaabsan.
- Goob bushukuleetiyo la dhigto.

*Ku talo galka 2040.

LA SOCO!

Qor iimeylkaaga si laguugu soo diro xogtii ugu dambeysay:

www.metrotransit.org/gold-line

Nagula soo xiriir iimeylka: goldline@metrotransit.org

Naga soo wac: 651-602-1955

Nagala soco:

@GoldLineBRT

@MetroTransitMN

If you need this information in an alternative format or language, contact:

- Si necesita esta información en un formato o idioma alternativo, póngase en contacto con:
 - Yog koj xav tau cov lus no txhais uas lus hmoob lossis xav tau ib tus neeg pab txhais cov lus no rau koj, tiv tauj:
 - Haddii aad dooneyso in aad macluumaadkan ku hesho siyaabo kale ama afaf kale, la xiriir:
 - နမ့်သးအိတ််းန့တတ်တတ်တတ်တတ်တတ်အံလတ်တတ်မံမံအကျိုလတ်တတ်တတ်တတ်အံအရီမုတမုကိတ်,ဆးကျို
- Liz Jones, Community Outreach Coordinator | 651-602-1977 • elizabeth.jones@metrotransit.org



Luulyo 2018